# Qorshaha lagaga hortegayo cunsuriyada

Gacaliye xannaaneeyayaal iyo waalidiin

Wasaaradda waxbarashada waxay diidaysaa dhammaan qaababka cunsuriyada oo dhan waxaana ka go'an ciribtirka dhammaan qaababka isir kala sooca gudaha dugsiyada dawlada NSW. Wasaaraddu Anti-Racism Policy (Qorshaha Lagaga soo Horjeedo Cunsuriyada) waxay ujeedadiisu tahay in la hubiyo inaan ardeyga, shaqaale, waalid, xannaaneeye ama xubin ka mid ah bulshada dugsigu kala kulmin cunsuriyad degaanka dugsiga.

Qorshuhu wuxuu weydiinayaa dhammaan xubnaha bulshada dugsiga inay caawiyaan in laga hortago cunsuriyada iyadoo la muujinayo xushmada dhaqameed, luuqadeed iyo asalada diimeed ee dadka kale, iyo in loo dhaqmo siyaalo kor u qaadaya aqbalaada iyo wanaag ku wada joogida degaanka dugsiga dhexdiisa.

Dugsi kastaa wuxuu leeyahay Sarkaalka Xiriirka Ka Hortaga Cunsuriyada (Anti-Racism Contact Officer (ARCO)) oo u tababaran inuu ka caawiyo ka hortaga cunsuriyada iyo taageerida bulshada dugsiga markay sameynayaan cabashooyin cunsuriyadeed oo dugsiga dhexdiisa ah. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qorshaha iyo doorka ARCO eeg Anti-Racism Policy - Information for parents and carers (Macluumaadka - Qorshaha Ka Hortaga Cunsuriyada ee loogu talalagalay xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta).

Waa ku mahadsan tahay inaad naga caawisid ilaalinta jawi dugsiyeed wanaagsan oo dhammaan qaababka cunsuriyada laga diiday. Fadlan ila soo xiriir haddii adiga ama ilmahaagu aad la kulantaan nooc kasta oo ah cunsuriyad, oo aad aragto qof alaale qofkii ay ku heysato cunsuriyadi dugsigeena, ama haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah ama taageero.

Waa daacadaadii

Maamulaha

## Caawimaada turjumaanka

Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya inaad dugsiga la hadasho ama inaad ballan ka sameysatid xubin shaqaalaha ka mid ah fadlan ka wac Adeegga Turjumaanka Taleefanka 131 450 oo ku weydiiso turjumaan luuqadaada.

U sheeg xiriiriyaha lambarka taleefanka dugsiga ka dibna xiriiriyaha ayaa wici doona dugsiga oo khadka soo gelin doona turjumaan kaa caawiya wadda hadalkaaga dugsiga.

Adeega turjumaanka lacag lagaama qaadi doono.